

**Bayaanka Xuquuqda Daryeelka Guriga Ay Ku
Midasanyihiin Federaalka iyo Gobolka ee Guri Ku
Daryeelidda Rukunka Quseeya**

**AYADOO LA RAACAAYO XEERKA MINNESOTA,
QAYBAHA 144A.44 IYO 144A.441 EE KU HABBOON
RUKUNKA ADEEGYADA DARYEELKA GURIGA KA
QAADANAYA 1) HAY'ADAHA AY MEDICARE
SHAHADAYSAY, IYO DARYEELAYAASHA SHATIGA
U HAYSTA DARYEELKA GURIGA EE BIXINAA GURI
KU DARYEELIDDA RUKUNKA SIDA AY KU
QEEXEENTAHAY 144G.**

**Luqadda farta adag ku daabacan waa ay meteleysaa
xuquuqyda dheeraadka ee rukunka, sida uu qorayo
sharciga federaalka ee loogu talagalagay bukaannada
hay'adaha ay Medicare shahaadasay.**

Bayaanka Xuquuqda

Qof adeegyada daryeelka guriga lagu siinayo xuquuqdaan ayuu leeyahay:

1. Xaq u leeyahay in la siiyo macluumaad qoraal ah ee xuquuqda ku taxluqa in laga hormariyo adeegyada lagu siinayo, ay ka midyihiin waxa laga yeeli doono haddii xuquuqda la jabiyo.
2. Xaq u leeyahay in la siiyo daryeelka iyo adeegyada ayadoo la tixraacayo qorshe ku habboon oo casri ah, iyo waafaqaya xeerarka daryeelka caafimaadka, heerarka daawaynta iyo

daryeelka, iyo qayb libaax ka qaato dhisidda, habaynta, iyo qiimeynta qorshaha iyo adeegyada. **Daryeeluhu waxaa shardi ku ah in uu rukunka si hordhac ah ugu sheego xaqa uu u leeyahay in qorsheynta daryeelka ama daawaynta uu ka qaybqaato.**

3. Xaq u leeyahay in si horraansho ah loogu sheego kahor inta aan adeegyada la siin, nooca iyo aqlaaqda shaqaalaha adeegyada ku siin doona, tirada booqashooyinka la soo jeediyay in lagu siiyo, doorashooyinka ee loo diyaarshay in ay wax ka qabtaan baahiyada daryeelka guriga, iyo saamaynta ay yeelan karaan marka adeegyadaan la diido.

4. Xaq u leeyahay in si hordhac ah lagu sheego in talooyin kastoo isbaddallada ee uu daryeelaha soo jeediyay ee qorshaha adeegyada ku jira iyo in aad qayb libaax ka qaadatid go'aan kasta ee isbaddallada qorshaha adeegyada ku taxluqa; **iyo qorsheynta kahor inta aan wax isbaddal ah la samayn.**

5. Xaq u leeyahay in uu adeegyada ama daawaynta diido.

6. Xaq u leeyahay in uu ogaado, kahor inta aan adeegyada la siin ama inta wareysiga booqashada u horreysa lagu jiro, caddadka ay noqonayaan adeegyada ka jira guriga daryeelaha.

7. Xaq u leeyahay in loo sheego, **iyo lagula taliyo, war iyo qoraal, labadaba**, kahor inta aan aadeegyada lagu bilaabin kharashyada uu daryeelaha adeegyada kugu soo dallacayo; illaa inta ay tahay lacagta ay bixin doonaan caymiska caafimaadka, barnaamijyada guud, ilaha kale, haddii la yaqaanno; iyo kharashka rukunka laga rabo in uu jeebkiisa ka bixinayo.

Daryeeluhu waa in uu qaataha adeegyada daryeelka guriga kala taliyaa, war iyo qoraal, labadaba, wixii isbaddal ah ee caymiska iyo qaataha khasaarahiisa lagu soo dallacayo sida ugu dhaqsiyo badan, balse aan ka dabamarin 30 cisho ee kalandarka kaddib marka uu daryeelaha ka warhelay jiritaanka isbaddalka.

8. Xaq u leeyahay in uu ogaado in ay dhici karto in ay jaalliyadda ka jiraan adeegyo kale, ay ka midyihiin adeegyada daryeelka guriga iyo daryeelayaal kale, iyo uu ogaado meesha ay macluumaadka adeegyadaan ku taxluqa laga raadinayo.

9. Xaq u leeyahay in uu si xor u kala xusho daryheelayaasha jira iyo daryeelayaasha baddasho kaddib marka ay adeegyada bilawdaan, ka bixin xuduuddada caymiska caafimaadka, caymiska daryeelka muddada dheer, gargaarka caafimaadka, iyo barnaamijyada kale ee caafimaadka.

10. Xaq u leeyahay in macluumaadka shakhsiyeed, maaliyadda, caafimaadka ee gaarka u ah la asturo, iyo loo sii sheego sida ay yihiin daryeelaha shuruudihiisa iyo habraacyada la xariira siidaynta macluumaadkaa.

11. Xaq u leeyahay in uu daabacdo rukunka xogtiisa iyo macluumaadka qoraalka ah ee xogtaas ku jira ayadoo la raacayo qaybaha 144.291 illaa 144.298.

12. Xaq u leeyahay in uu adeegyada ka helo dad tababar fiican haysta iyo tayo u leh in ay hawshooda ku gutaan.

13. Xaq u leeyahay in la xushmeeyo iyo la xaqdhawro, rukunka waxiisa la xaqdhawro.

14. Xaq u leeyahay in uu xor ka ahaado xadgudubka jirka iyo qaylada, dayaca, iyo guud ahaan nooc walba ee darxumayn ee ku xusan Sharciga Dadka Waaweyn ee Baylahan iyo Sharciga Darxumeynta Caruurta.

15. Xaq u leeyahay in si cagligal ah, la sii ogeysiiyo isbadallada ku soo fool leh adeegyada iyo kharashyada.

16. Xaq u leeyahay in uu ogaado daryeelaha sababtiisa uu adeegyada uga joojinayo.

17. Xaq u leeyahay in si cagligal ah, hordhac ahaan lagu ogaysiiyo isbaddallada adeegyada ama kharashyada, ay ku jirto ugu yaraan 30 cishood in hordhac ahaan lagugu ogeysiiyo in daryeelaha uu adeegyada joojinayo, marka laga reebo xaalado sida:

(i) qaataha uu la yimaado dhaqamo baddalaya xaaladaha shaqada sida lagu caddeeyayay qandaraaska dhexmaray guriga daryeelka iyo shakhsiga bixinaya adeegyada daryeelka guriga, ama uu abuuru jawi xadgudub leh ama u daran nabadgalyada shaqada qofka adeegyada daryeelka guriga siinaya;

(ii) xaalad degdeg ee soo foodsaarta daryeelaha aan rasmi ahayn ama isbaddal weyn ee ku timaadda qaataha xaaladdiisa ay sababto in adeegyada hadda la bixiyo buuxin karin heshiiska daryeelaha lala galay iyo in daryeelaha guriga uusan si ammaano leh uga soo bixi karin; ama

(iii) daryeelaha uusan helin qaansheegtada adeegyada, kuwaaso ugu yaraan toban cishood hordhac ahaan lagu ogeysiiyo joojinta adeegyada la siin doono.

18. Xaq u leeyahay in uu helo wareejin isuduwan marka ay dhacdo in uu isbaddal ku dhaco adeegyada uu daryeelaha bixin doono.

19. Xaq u leeyaahay in uu ka cawdo waxa adeegyada lagu siinayo ku taxluqa, ama lagu siin waayay, iyo xushmad la'aanta iyo xaqdhawrid la'aanta ee rukunka nafsaddiisa ama hantidiisa soo foodsaartay.

20. Xaq u leeyahay in uu ogaado sida loola xariirayo shakhsi la shaqeeya daryeelaha guriga daryeelka ee masuul ka ah xallinta mushkiladaha iyo in uu daryeelaha uu xil iska saaro in uu baaro iyo iskudayo in uu aanada ama cabashada xalliyo. **Daryeeluhu waa in uu qoraal ku diwaangeliyo cabashooyinka oo idil, isla markaa ku diwaangaliyo, si qoraal ah, xallin kasta ee ka ashtakada ku socota qof kasta ee adeegyada bixinayay asagoo qabanaya shaqada uu daryeelaha u diray.**

21. Xaq u leeyahay in uu ogaado magaca iyo cinwaanka ee hay'adda gobolka ama degmada si uu ugula xariiro macluumaad ama gargaar dheeraad ah.

22. Xaq u leeyahay in uu shakhsi ahaan ku adkaysado xuquuqdaan, ama uu ku adkaysto rukunka wakiilkiisa ama qof kasta ee rukunka metelaya, ay aargosashada ka reebantahay. **Daryeeluhu waa in difaaco iyo hormariyo xuquuyadaan.**

**HADDII AAD CABASHO KA QABTID WAX KU
TAXLUQA DARYEELAHA AMA QOFKA BIXINAYA
ADEEGYADAADA GURIGA DARYEELKA, WAXA AAD
WACI KARTA, U QORI KARTAA, AMA TEGI KARTAA
XAFIISKA CAABASHOYINKA RUGTA, WAAXDA
CAAFIAMADKA EE MINNESOTA. WAXAA KALE EE
AAD LA XARIIRI KARTAA XAFIISKA SARKAALKA
BAARA ASHTAKADA DARYEELKA MUDDADA
DHEER AMA XAFIISKA SARKAALKA BAARA
ASHTAKADA CAAFIMAADKA DHIMIRKA IYO
NAAFONIMADA KORITAANKA.**

Xafiiska Cabashooyinka Rugta Caafimaadka

Telefoonka: (651) 201-4201 ama 1-800-369-7994

Fakis: (651) 281-9796

Shabakadda Internetka:

<http://www.health.state.mn.us/divs/fpc/ohfcinfo/contohfc.htm>

Iimeylka: health.ohfc-complaints@state.mn.us

Cinwaanka Warqadaha Loo Dirayo:

Minnesota Department of Health
Office of Health Facility Complaints
85 East Seventh Place, Suite 300
P.O. Box 64970
St. Paul, Minnesota 55164-0970



Sarkaalka Baara Cabashada Daryeelka Muddada Dheer

Telefoonka: (651) 431-2555 ama 1-800-657-3591

Fakis: (651) 431-7452

Shabakadda Internetka: <http://tinyurl.com/Ombudsman-LTC>

Iimeylka: mba.ooltc@state.mn.us

Cinwaanka Warqadaha Loo Dirayo:

Home Care Ombudsman

Ombudsman for Long-Term Care

P.O. Box 64971

St. Paul, MN 55164-0971

Sarkaalka Baara Cabashada Caafimaadka Dhimirka iyo

Naafoonimada Koritaanka

Telefoonka: 651-757-1800 ama 1-800-657-3506

Fakis: 651-797-1950 ama 651-296-1021

Shabakadda Internetka: <http://mn.gov/omhdd/>

Iimeylka: ombudsman.mhdd@state.mn.us

Cinwaanka Warqadaha Loo Dirayo:

121 7th Place East

Suite 420 Metro Square Building

St. Paul, Minnesota 55101-2117

Magaca Shatiilaha: _____

Telefoonka: _____

Iimeylka: _____

Cinwaanka: _____

Magaca/Darajada Qofka ay dhici karto in loo dirayo

Dhibaatooyinka ama Cabashooyinka:



Ujeeddoyin maclumaad bixin keliya loogamana baanha qoraalka Bayaanka Xuquuqda Daryeelka Guriga: Xeerarka MN, qaybta 144A.44

Qaybhoosaadka 2. Fasiraadda iyo adkaynta xuquuqda.

Xuquuqdaan waxaa loo dhisay maslaxadda rukumada ee la siinayo adeegyada dareyeelka guriga. **Daryeelayaasha daryeelka guriga oo idil ay ku jiraan kuwa ka reeban ee hoosimaanaya qaybta 144.471, waa in ay addeecaan qaybtaan.** Maamulaha waxa uu adkayn doonaa qaybtaan iyo shuruuda daryeelayasha xuquuqda guriga daryeelaka ee ka reeban shatiyaynt ee iskusi ugu dhigma guri shatiga haysta. Daryeelaha guriga daryeelka kama uu codsan karo ama amri karo qofka in uu ka tanasulo mid kasta ee ka mid xuquuqdaan ee shuruud looga dhigayo helitaanka adeegyada. Qaraarkaan xuquuqda ma uu baddalayo ama hoos uma uu dhigayo xuquuqda iyo madax bannanida kale ee ka jira meesha ay rukumada adeegyada daryeelka guriga ka helayaan, dadka bixinaya adeegyada daryeelka guriga, ama daryeelayaasha shatiga leh ee hoosimaanaya qaybaha 144A.43 illaa 144A.482.

144A.442 RUKUNKA GURIGA LAGU DARYEELAYO; JARISTA ADEEGYADA.

Haddii daryeelaha guriga daryeelka nidaamsan, sida ay ku qeexantahay qaybta 144D.01, qaybhoosaadka 2a, oo haddana ahayn mid aqoonsiga Medicare haysta uu joojiyo heshiiska adeegyada ama qorshaha adeegyada ee rukunka guriga lagu daryeelayo, sida ay ku qeexantahay qaybta 144G.01, qaybhoosaadka 3, daryeelaha guriga daryeelka waa in uu rukunka guriga lagu daryeelayo iyo wakiilkiisa sharciga ama loo

magacaabay rukunka, haddi uu mid jiro, siiyo ogaysiis qoraal ah ee jarista ee la soo raacinayo macluumaadka soo socda:

(1) taariikhda rasmiga ah ee joojinta hirgalayso;

(2) sababta loo jaray;

(3) ayadoon la sii kordhin xilliga jarista, bixin cad ee qancinaysa rukunka guriga lagu daryeelayo ama walkiilka rasmiga ee rukunka wax aan ka badanayn toban cisho ee la shaqeeyo ee ogaysiiska taariikhda jarista si looga wadahadlo jarista;

(4) cidda lagala xariirayo muddo caqligae gudaheeda tirada guryaha daryeelka ee daryeeleyale kale ee aan sidaasi uga fogeyn guriga rukunka lagu daryeelayo, sida uu qorayo Xeerka Minnesota, qaybta 4668.0050 (Minnesota Rules, part 4668.0050);

(5) qaraar uu daryeeluhu kaga qaybqaadan doono ee si nidaamsan daryeelka rukunka lagu wareejinayo daryeele kale ama daryeel-bixiye, sida ay qorayso qaybta 144A.44, qaybhoosaadka 1, tuducda (17);

(6) magaca iyo macluumaadka qofka ah wakiilka daryeelaha guriga daryeelka kaaso uu rukunka kala hadlayo ogaysiiska jarista adeegyada;

(7) koobiga bayaanka xuquuqda guriga daryeelka; iyo

(8) qaraarka ah ogaysiiska jarista adeegyada daryeelka guriga ee daryeelaha guriga daryeelka ka imaanaya ma uu noqonayo ogaysiiska jarista guriyeynta lala leeyahay qandaraaska adeegyada guriyeynta leh dhisidda adeegyada.